## Ciqaabta Dugsiga

**Ciqaabta ka Dambeyso Jebinta Sharciyada Waajibka Tagidda Dugsiga**

- Waxaa dhici karto in la ganaaxo waalidiinta ardayga gooyo.
- Ardayda jirta 12 sanno iyo ka badan waxay lumin karaan axsaanka wadidda baabuurka ilaa ay ka gaaraan 18 sanno.
- Ardayda waxaa la ganaaxi karaa ilaa $100 ama waxaa lagu amri karaa in ay dhamaystiraan saacadaha loo adeeggo bulshada.
- Garsooraha wuxuu waalidiinta ka codsan karaa in ay cunugooda geeyaan dugsiga subax kasta.
- Ardayga waxaa lagu meeleyn karaa tijaabin lagu kormeero, halkaas uu cunugga joogi doono guriga iyo dugsiga.
- Ardayga waxaa lagu meeleyn karaa in uu hoos yimaado ammarka xabsiga guriga.
- Waxaa dhici karto in ardayga lagu amro in uu ka qeybgalo la-tallin ama daweyn.
- Ardayga waxaa lagu amri karaa in uu dhamaystiro baarista/qiimeynta ku-tiirsanaanta kiimikada kaddibna waxaa lagu amri karaa in uu raaco talooyinka la-tallinta, waxbarashada, daweynta iyo daryeelka kaddib.
- Ardayga waxaa lagu amri karaa in uu tago Dugsiga PINES ee ku yaal xarunta dhallinta ama in uu tago dugsiga kuleylaha.
- Waxaa dhici karto in garsooraha uu ardayga ku meeleeyo dibadda guriga.

## Fariinta ku Socoto Ardayda

*Arday ahaan, waxaa ku saaran waajibka in aad tagtid dugsiga maalin kasta, iyo in aad tagtid fasal kasta.*

*Haddii aad maqan tahay, waa in aad haysatid cududaar sharci ah oo hagaagsan si aad dibadda uga joogtid dugsiga. Waxaan kaa rabnaa in aad sharaftid naftaada iyo dugsigaada iyo waxaan kaa rabnaa in aad ku guuleysatid dugsiga iyo nolosha. Waan daneynaa iyo waxaan haynaa dad ku kaalmeyn karo adiga. Waxaan kaa rabnaa in aad ku jirtid gudaha fasalka, ma rabno in aan kugu aragno waddooyinka.*

***Joog dugsiga - waa furaha mustaqbalkaada.***

***Ardayga ka qalin jebiyay dugsiga sare wuxuu filan karaa in uu shaqeysto $388,000 dheeraad ah cimrigiisa marka loo fiiriyo ardayga ka tagay dugsiga sare.***

**Macluumaadka waxaa bixiya:**
***Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Dagmada Anoka***
***Tony Palumbo, Xeer Ilaaliyaha Dagmada Anoka***

***Truancy Intervention Program***
2100 Third Avenue, Suite #720
Anoka, MN 55303-2265
Macluumaadka Guud: (763) 323-5586
Barnaamijka Faragelinta Goynta: (763) 323-5589
Faks (763) 323-5651
attorney@co.anoka.mn.us
www.AnokaCounty.us

# Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Dagmada Anoka Barnaamijka Faragelinta Goynta

***Hagaajinta Tagidda Dugsiga iyo Yareynta Dambiga***

ANOKA COUNTY ATTORNEY'S OFFICE
L'ETOILE DU NORD

## Fariin ka socoto Tony Palumbo, Xeer Ilaaliyaha Dagmada Anoka

Tagidda dugsiga waa waajib ka jira gobolka Minnesota si loo hubsado in dhamaan caruurta helaan xirfadaha loo baahan yahay una guuleystaan marka ay weynadaan.

Daraasaadka waxay muujiyeen in uu jiro xariir toosan oo ka dhexeeyo goynta iyo cunugga dhibaatada qaba, sida hawlaha dambiyada. Ardayda gooysa waxay badanaa galaan xaaladaha saamayn kara mustaqbalkooda, sida dhibaatada lagala kulmo helitaanka iyo xajinta shaqada. Marka laga hadlo goynta, waxaan hagaajin karnaa nolosha caruurtena iyo waxaan kordhin karnaa suurtogalka in ay ahaan doonaan xubno ka tirsan bulshada oo soo saar leh. Taasii waa sababta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Anoka u sameyay Truancy Intervention Program (Barnaamijka Faragelinta Goynta - TIP).

Xafiiska Xeer Ilaaliyana Dagmada wuxuu kaashadaa lana shaqeyaa saraakiisha dugsiga, hirgelinta sharciga, dhaqan celinta iyo adeegyada bulshada si uu u farageliyo horaanta wareegga goynta. TIP waxay xoojisaa dugsiyada, qoysaska iyo bulshada si loola diriro goynta, si loo kordhiyo tagidda dugsiga iyo si loo yareeyo dambiyada la galo maalinimada.

Muhiimadda TIP waa in ardayda gooysa laga wado jidadka, lagu ogaado dugsiyada, iyo laga saaro maxkamadda dhallinta. Waxay cunugga siisaa fursad fiican uu ku noolaado iyo waxay fa'iido u leedahay dhamaan bulshada.

**Mahadsanid,**

Tony Palumbo



Tony Palumbo
Xeer Ilaaliyaha Anoka

## Goynta iyo Maqnaashada

**Sifeynta Gooyaha**
Caruurta jirta 12 sanno ama ka badan waxaa loo haystaa in ay gooyeen dugsiga haddii aysan jirin sabab sharciga ogol yahay kana maqan yahiin dugsiga saddax ama afar xissad muddo saddax maalin. Caruurta jirta 17 sanno ama ka badan waxaa loo haystaa in ay gooyeen dugsiga haddii aysan jirin sabab sharciga ogol yahay oo looga reebo dugsiga, ogolaashana laga haynin waalidka.

Sida ay u arkaan, dugsiyada waxay adeegsan karaan habka TIP haddii ardayga ka maqan yahay dugsiga hal xisso ama ka badan muddo saddax maalin ama ka badan.

**Maqnaashada**
Waalidka/Ilaaliyaha wuxuu raadsan karaa in uu cunugiisa/cunugeeda fasax uga soo qaado dugsiga. Dugsiga wuxuu xaq u leeyahay in uu ogolaado ama diido arjiga lagu soo dalbado maqnaashada.

***Cududaarka la Ogolaan Karo Waxaa Ka Mid ah:***

- Cudurka - mattagga, shubanka, qandhada (ka sareyso 101)
- Booqashooyinka takhtarka iyo ilkaha (sida caafimaadka dhimirka) - haddii aan la awoodin in la qabto ballanka saacadaha dibadda laga yahay dugsiga
- Fasaxa diinta aan horay ugu jirin jadwalka dugsiga
- Degdegga qoyska - dhimashada ama cudurka aad u darran oo ku dhaca xubin ka tirsan qoyska

***Tusaalooyinka Cududaarada Aan La Ogoleyn:***

- In la joogo guriga si loo haayo caruur/baahida ka jirta guriga
- Shaqo, ama nasasho laga qaato shaqo
- Safar
- Cimilada qaboobaha marka dugsiga aan la xeran
- Baska oo ka taga
- Cunugga aan la talaalin

## Fariinta ku Socoto Waalidiinta - Habka Afarta Talaabo ee TIPS

**Waa ujeedada Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Anoka in uu joojiyo goynta. TIP waxay adeegsataa habka afarta talaabo si ay ula dirirto goynta.**

**Talaabada Kowaad**
Dugsiga wuxuu warqad u soo diraa waalidiinta si uu u ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha in cunugooda gooyay.

**Talaabada Labaad**
Kaddib marka la helo warqadda ogeysiinta, haddii ay soo baxaan maqnaasho dheeraad ah oo aan la fasixin, dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Dagmada. Waxaa warqad loo diraa waalidka/ilaaliyaha iyo ardayga, taasoo ku soo dhaweysa in ay tagaan shir. Shirkaan wuxuu xoogga saari doonaa saddax qodob waaweyn:

1) Waalidiinta waa in ay caruurtooda u diraan dugsiga si ay u horumariyaan tayada nolosha caruurta.
2) Waxbarashada waa lagama maarmaan sida raashinka, labbiska, iyo hooyga nolosha cunugga.
3) Waxaa laga hadli doonaa lana sharaxi doonaa habka dacwad ku oogidda.

**Talaabada Saddaxaad**
Shirka kaddib, haddii cunugga uu mar kale gooyo iyo aysan jirin sabab sharciga ogol yahay, cunugga waxaa loo diri karaa dhageysiga Anoka County Diversion (Leexinta Dagmada Anoka). Dhageysigaan, heshiiska tagidda cunugga waxaa lagala xaajoon doonaa ardayga iyo waalidiinta. Fariinta muhiimka ah waxay tahay waajibka waalidiinta saaran in ay caruurtooda u diraan dugsiga iyo waajibka cunugga saaran in uu tago dugsiga.

**Talaabada Afaraad:** Haddii dhageysiga Diversion (Leexinta) uusan dhallinin horumarinta tagidda dugsgia, Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Dagmada wuxuu kiiska gaarsiin karaa maxkamadda Dhallinta.